Tilmaamaha loogu talagalay Muwaadiniinta

Ujeedada socdaalka

Dhaq dhaqaaqa ama socdaalka muwaadiniinta si loogu adeego baahiyaha, taas oo aan looga haqabtiri karin dariiqyo kale, waxaa kaliya oo loo oggol yahay ujeeddooyinka hoos ku xusan:

1. Aadida iyo ka imaashaha goobaha shaqada saacadha shaqada ,

2. Booqashada farmashiiyayaasha , xarumaha dhiig yaboohida iyo dhaqaatiirta,

3. Booqashada dukaamada cuntada iyo adeegyada daruuriga ah ,

4. Booqashada Bangiyada hadii aysan la heen aaladaha aad ugu maarmi karto,

5. Hadii ay jirto xaalad daruuri ah booqashada goobaha Dowlada , xarumaha adeega dadweynaha , iyo dowladaha hoose,

6. Sodaalka u jeedkiisu yahay caawinta iyo u gar gaarida muwaadiniinta qabo baahiyada gaarka ah, dadka aan is daryeeli Karin iyo kuwa ku jiraan Karaantiilka iyo mudada huurinta.

7. Dhaq dhaqaaqa jir dhiska waa in uu kali noqodaa ama ugu badanaa Laba qof waana goob aan ka fogaan guryihiina ,

8. Booqashada Qaraabada koowaad iyo labaad iyo xafladaha , tacsiyada , aroosyada , kulumada diimaha, waxaana loo ogol yahay in aysan ka badan 10 qof,

9. Dhamaan dhaq dhaqaaq walba oo aan u jeedooyin cudur daarkaasi la heen waxaa laga yaabaa in uu hoos yimaad kuwi la xayiray,

Ansixinta Ujeeddada Dhaqdhaqaaqa

Tagista iyo kasoo rawixista goobta shaqada inta lagu jiro saacadaha shaqada, ogolaanshaha socdaalka waxaa lagu qeexay (Dukumintiga A) waxaana bixinkara, Cida masuuliyada saxiixa leh qofka loo shaqeeyo, ama wakiilkiisa sharciga u leh, wakiilka oo noqon kara qareenkiisa ama, xirfadle madax-bannaan ama qof isagu ama iyadu iskii u shaqeysta.

Dhamaan kiisaska kale ee socdaalada, ogolaansha socdaalka oo loola jeedo dhaqdhaqaaq kasta waxaad ka heleysaa (Dukumentiga B), waxaa saxiixi kara qofka ay quseyso asaga/ayada ayaa qaadaya masuuliyadda, waxaana ku jira magaciisa / magaceeda ama magaca Qoyska, taariikhda dhalashada, aqoonsi ama lambarka baasaboorka, cinwaanka guriga, waqtiga socdaalka iyo sidoo kale ujeedada gaarka ah ee socdaalka.

Socdaal kasta, muwaaddiniintu waa inay wataan caddeyn aqoonsi - kaar aqoonsi ama baasaboor - sidoo kale dukumintiga ogolaanshaha socdaalka oo dhameystiran (mid daabacan ama mid gacanta ku qoran) ama FARIIN QORAALKA ogolaanshaha looso diray, si ay u soo bandhigaan haddii ay dhacdo in laga hubiyo.

Hubinta Dukumiintiyada socdaalada

Dukumintiga A: hubinta socdaalka Shaqaalaha

Si loo hubiyo socdaalka shaqaale (Dukumenti A) tagista ama ka imaanshaha goobta shaqada, waa in la buuxiyaa dukumintiga soo socda **(waana in lagu buuxiyaa English ama Greek kaliya):**

- **Hubinta socdaalka Shaqaalaha**

Dukumentiga B: Bayaanka socdaalka muwaadiniinta laga soo reebay.

Marka laga hadlayo bayaanka socdaalka muwaadiniinta ee kiisaska gaarka ah (Dukumintiga B), waxaa jira labo xulasho, sida soo socota:

- Ku dir **FARIIN QORAAL**,

Buuxi oo daabac Dukumentiga B (Dukumintiga ogolaanshaha socdaalka) (waa in lagu buuxiyaa Ingiriis ama Greek kaliya):

- **Hubinta socdaalka Muwaadiniinta laga soo reebay.**

<u>Tilmaamaha loogu dirayo FARIIN QORAALKA</u>

FARIIN QORAALKA waxaad ka soo diri kartaa taleefankaaga gacanta adigoo ku diraya lambarka 8998 si bilaash ah.

FARIIN QORAALKU waa inuu u qornaadaa qaabkan soosocda:

X *Meel banaan* **Kaarka ama Basaboor Nambarka** *Meelbana* **Boosto Nambarkaaga**

X waxay u taagan tahay ujeedada socdaalka adigoo dooranaya lambarka la xiriira 1, 2, 3, 4, 5, 6, 7, 8 oo u taagan ujeedooyinkan soo socda:

1. Booqashada farmashiiyayaasha , xarumaha dhiig yaboohida iyo dhaqaatiirta,

2. Booqashada dukaamada cuntada iyo adeegyada daruuriga ah ,

3. Booqashada Bangiyada hadii aysan la heen aaladaha aad ugu maarmi karto,

4. Hadii ay jirto xaalad daruuri ah booqashada goobaha Dowlada , xarumaha adeega dadweynaha , iyo dowladaha hoose,

5. Sodaalka u jeedkiisu yahay caawinta iyo u gar gaarida muwaadiniinta qabo baahiyada gaarka ah, dadka aan is daryeeli Karin iyo kuwa ku jiraan Karaantiilka iyo mudada huurinta.

6. Dhaq dhaqaaqa jir dhiska waa in uu kali noqodaa ama ugu badanaa Laba qof waana goob aan ka fogaan guryihiina ,

7. Booqashada Qaraabada koowaad iyo labaad iyo xafladaha , tacsiyada , aroosyada , kulumada diimaha, waxaana loo ogol yahay in aysan ka badan 10 qof,

8. Dhamaan dhaq dhaqaaq walba oo aan u jeedooyin cudur daarkaasi la heen waxaa laga yaabaa in uu hoos yimaad kuwi la xayiray,

Kadib marka ay diraan farriinta, muwaadiniintu waxay xaq u leeyihiin inay socdaalaan muddo cayiman oo ku xidhan ujeedada scodaalka. Jadwalka waqtiga waxaa hada loo cayimay 3 saacadood dhamaan ujeedooyinka kor ku xusan.

Kadib marka aad dirto **FARIIN QORAALKA**, waxaan heleysaa jawaab u qoran habkan soo socda:

Haa *Meel banan* **X** *Meel banan* **Kaarka ama Basaboor Nambarka** *Meelbana* **Boosto Nambarkaaga ogolaasha waqitiga uu kuugu eg yahay**

Haddii ay dhacdo baaritaan booliis, muwaaddiniintu waa inay tusaan FARIIN QORAALKA oo ay la socdaan Aqoonsigooda ama baasaboorkooda. Intaas waxaa sii dheer, Booliska ayaa eegi doona in si khaldan loo adeegsanayo adeeggan FARIIN QORAALKA ee loo dirayo lambarka 8998.

Baaqa Muwaadiniinta

Haddii ay dhacdo in muwaaddiniintu aysan helin dukumiintiyada la shaaciyay ee ogolaanshaha socdaalka, waxay soo qaadan karaan warqad ogolaasho gacanta lagu qoray oo ay ku jiraan macluumaadka soo socda: Magaca oo dhameystiran, taariikhda dhalashada, Aqoonsiga ama lambarka baasaboorka, cinwaanka degenaanshaha, waqtiga socdaalka iyo sidoo kale ujeedada gaarka ah ee socdaalka (waana inuu noqdaa mid ku jira qeybaha laga soo reebay socdaalada la mamnuucay ee aan loo baahnayn, maadaama kuwan lagu xiray shuruudo lagu qeexay Qaraarkan/ dekreetadan laxiriirta.)

Saxiix iyo Taariikhda.